



**SOMALI NATIONAL
BUREAU OF STATISTICS**
Federal Republic of Somalia

TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA LUULYO 2024



Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Julaay 2024 ayaa gaaray 152.92, marka la barbardhigo 151.35 bishii Juun 2023.

Isbedel bileedka, Julaay 2024, marka la barbar dhigo Juun 2024, ayaa sare u kacay 1.04 boqolkiiba. Sare u kaca ugu badan ee billaha ahi ayaa ahaa qiimaha **Hawo Bedeleshada & Dhaqanka** 13.89 boqolkiiba & **Gaadiidka** 11.45 boqolkiiba. Sare u kaca **Hawo Bedeleshada & Dhaqanka** ugu badan ayaa inta badan ka yimid qiima kororka **Maqal & Muuqal, Sawir iyo Habaynta Macluumaadka** +17.57 boqolkiiba. Qiimaha kororka **Gaadiidka** ayaa ka yimid qiimaha **Adeegyada Gaadiidka** +16.06 boqolkiiba.

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Julaay 2023 iyo Julaay 2024 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 5.54 boqolkiiba, marka la barbardhigo 5.31 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Juun 2023 iyo Juun 2024.

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Julaay 2024 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Julaay 2024	
Tusaha bishan (Julaay 2024)	152.92
Tusaha bishii hore (Juun 2023)	151.35
Tusaha sanadkii hore (Julaay 2023)	144.89
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	1.04%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	5.54%

Heerka sicir bararka marka loo eego TSB-da

Isbedelka boqoleyda ee 12billood

Tixraca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha Xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Juulay 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Julaaq 2024

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Julaaq 2024

Heerka sicir-bararka bisha Julaaq 2024 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) 12kii bilood ee la soo dhaafay, Julaaq 2023 iyo Julaaq 2024.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 5.54 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Julaaq 2023 iyo Julaaq 2024, marka labar bardhigo 5.31 boqolkiiba 12kii bilood, Juun 2023 iyo Juun 2024.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ee Julaaq 2024 ayaa sameeyey sare u kac dhan 1.04 boqolkiiba.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Julaaq 2024.


Heerka sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada** iyo **guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi hoos u dhacay -0.75 boqolkiiba, bishii Julaaq 2024 marka la barbardhigo sare u kac gaaraya -1.60 boqolkiiba bishii Juun 2024. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu sare u kaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay -1.19 boqolkiiba bishii Julaaq 2024. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray 0.07 boqolkiiba Juun 2024.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa sare u kac bille ah sameeyey 2.91 boqolkiiba ee Julaaq 2024. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sare u kacay 6.84 boqolkiiba Julaaq 2024. Tan ayaa imaanaysa marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray 3.41 boqolkiiba ee Juun 2024.

Dhammaan qeybaha TSB-da & qeybaha la xushay.

Index = 100 @ December 2014




Isha Xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Juulay 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Julaay 2024(Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Isgaarsiinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 41.55 boqolkiiba bishii Julaay 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+59.44 boqolkiiba).
- **Hawo Bedeleshada & Dhaqanka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 31.60 boqolkiiba Julaay 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha Maqal & Muuqal, Sawir iyo Macluumaadka oo u gaaray (+39.12 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle 28.14 boqolkiiba bishii Julaay 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Hoteelada (+43.00 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 21.77 boqolkiiba Julaay 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (+24.34 boqolkiiba).
- **Dharka & Kabaha** ayaa la diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 18.06 boqolkiiba Julaay 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+19.27 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka caruurta (+80.74 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 17.66 boqolkiiba Julaay 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha lagu iibsado Gawaarida oo gaaray (+23.59 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 15.48 boqolkiiba Julaay 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dhalada, Maacuunta & Agabka miisaska (+19.86 boqolkiiba).
- **Cafimaadka** ayaa lagu diiwaan geliyey sare u kac sanadle ah 7.14 boqolkiiba, bishii Julaay 2024. Sare

War bixin bileedka bisha **Juulay 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Agabka Caafimaadka (+7.56 boqolkolkiiba).

- **Kirada Guryaha & korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 6.84 boqolkolkiiba bishii Julaay 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha agabka dayactirka iyo hagaajinta guriga (+18.11 boqolkiiba).


Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bishii Julaay 2024(-)

- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey hoos u dhac sanadle ah oo gaaraya -12.21 boqolkiib bishii Julaay 2024. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid tubaakada gaar ahaan sigaarka (-26.15 boqolkiiba).

B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya qeybaha kala duwan ee TSB –da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Julaay 2024

(Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Julaay 2024(+)

- **Hawo Bedeleshada & Dhaqanka** ayaa sameeyey sare u kac Bille ah oo gaaraya 13.89 boqolkiiba Julaay 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha Maqal & Muuqal, Sawir iyo Habaynta Macluumaadka oo u gaaray (+17.57 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac Bille ah oo gaaraya 11.45 boqolkiiba Julaay 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha lagu iibsado Gawaarida oo gaaray (+16.06 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac Bille 7.87 boqolkiiba bishii Julaay 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Hoteelada (+11.10 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac Bille ah oo dhan 5.55 boqolkiiba Julaay 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dhalada, Maacuunta & Agabka miisaska (+6.38 boqolkiiba).

War bixin bileedka bisha **Juulay 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

- **Cafimaadka** ayaa lagu diiwaan geliyey sare u kac Bille ah 4.44 boqolkiiba, bishii Julaay 2024. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha adeega Cusbitalada (+13.65 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac Bille ah oo gaaraya 4.22 boqolkiiba Julaay 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (+11.08 boqolkiiba).
- **Kirada Guryaha & korontada** ayaa sameeyey sare u kac Bille ah 2.91 boqolkiiba bishii Julaay 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha biyo gelinta Guryada & adeegyada yar yar (+9.00 boqolkiiba).

Qeybaha ugu waaweyn oo sicirkoodu hoos u dhacay

- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey hoos u dhac Bille ah oo gaaraya -10.02 boqolkiib bishii Julaay 2024. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid tubaakada gaar ahaan sigaarka (-11.11 boqolkiiba).
- **Dharka & Kabaha** ayaa la diiwaan galiyey hoos u dhac bille ah oo dhan -4.71 boqolkiiba Julaay 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (-6.44 boqolkiiba), hoos u dhaca waxaa sababay Dharka Caruurta -10.82 boqolkiiba.

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Julaay 2024ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Julaay 2023 TSB	Juun 2024 TSB	Julaay 2024 TSB	% Boqolkii ba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan Qeybaha Tsb	100.00	144.89	151.35	152.92	1.04	5.54
Cuntada & Cabitaanada	46.04	150.10	149.44	148.32	-0.75	-1.19
Tubaakadda	1.25	167.33	156.39	146.90	-6.07	-12.21
Dharka & Kabaha	5.03	169.47	209.96	200.08	-4.71	18.06
Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale	23.41	139.23	144.55	148.75	2.91	6.84
Agabka Guryaha	2.93	116.56	127.53	134.60	5.55	15.48
Caafimaadka	5.00	178.18	182.78	190.90	4.44	7.14
Gaadiidka	3.77	121.29	128.06	142.72	11.45	17.66
Isgaarsiinta	2.80	130.10	184.16	184.16	0.00	41.55
Hawo Bedeleshada & Dhaqanka	1.00	104.30	120.51	137.25	13.89	31.60
Tacsiinta	4.00	116.95	117.10	115.66	-1.23	-1.10
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	150.45	178.72	192.79	7.87	28.14
Alaabaha Yaryar & Adeegyada	2.77	119.47	139.58	145.48	4.22	21.77

War bixin bileedka bisha **Juulay 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.


Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Agoosto, 2024 waxaa la baahin doonaa 15 Sebtembar, 2024. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

Lifaaqa 1aad: Dhamaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Juulaay 2024 marka loo eego COICOPka

Dhamaan qeybaha TSB-da

Qeybaha ka qeybqaata (%) Heerka sicir bararka (COICOP)



Isha Xogta: NBS

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bishsa oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha **Juulay 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia